



---

XRW/0000000.00/00/11

21.11.2011

Mudanyaal iyo Marwooyin,

Maanta waa Maalin Taariikhi ah oo aan u doornay si wadajir ah inaan uga tashano aayaha Qarankeena, una qeexno Qaranka aan dooneyno sidii u shaqeyn lahaa, Sharcigii Qarankaasi ku shaqeyn lahaa, Qarankaas oo noqda mid dhowra Xuquuda iyo Xoriyadda Muwaadinka Soomaaliyeed.

Walaalayaal si loo helo Qaran ay u dhan yihiin sifooyinka kor ku xusan. Wuxaan u baahanahay DASTUUR. Gola-fadhiga maanta inoo ka bilowday Garowe, oo ujeedooyinkiisa ay ka mid tahay; Dhameytirka Dastuurka qabyada ah.

Su'aashu waxay tahay waa side nooca dastuur oo aan dooneynaa; muxuuse Dastuurkaasi u qaban shacabka Soomaaliyeed?

Wuxaan dooneynaa Datuur waafaqsan Shareecada Islaamka,

Dastuur kor u qaada qiyamka, soona celiya sharafka Muwaadinka Soomaaliyeed,

Dastuur qeexaya Madaxbaanida Qarankeenna, Baaxdda berigeenna iyo biyaheenna, Luuqadaha Dalkeenna, xuquuqda haweenka, Xuquuqda caruurta, dhowrista degaanka, lahaanshaha hantida gaarka ah, xuquuqda shaqaalaha, xuquuqul Qowlka, Xuquuqda Xisbiyada, Xuquuqda Amniga iyo Nabadgelyada

Dastuur noo horseeda Dowladnimo buuxda,

Dastuur soo afjara wakhtiga KMG ah oo dowlaadeenimadeenu ku shaqeyneysay muddo aad u dheer

**Walaalayaal, haddii aan wax ka taabto habka Federalismka:**

Axdi Qarameedkii KMG ah ee Dowladdu ku shaqeynesysay ilaa iyo sanadkii 2004tii, Qodobkiisa 11, faraqiisa kowaad, wuxuu leeyahay waa in Dowladda Soomaaliyeed noqoto Dowlad ku dhisan

hab-dowliga Federalismka. Habkan oo aan muddo ku shaqeyneynay, Maanta waxaa inoo yaal sidii aan u dhemystiri lahayn hirgelintiisa. Habkan Dowladnimo oo ay u arkeen madaxdii iyo xildhibaaniintii Soomaaliyeed in uu yahay hab Dowliga keliya ee dib isugu soo celin kara Shacabka iyo Gobolada Soomaaliyeed.

Baarlamanka (Parliamentary reform):

Walaalayaal, Baarlamanku waa xubin muhiim ah oo ka mid ah Dowladnimadeenna, haddaba si loo gaaro, loona fuliyo rabitaanka shacabka Soomaaliyeed, waxaa si wadajir ah bishii November loo dhisay Guddi wadajir ah (Joint Committee) oo shaqadoodu tahay dib u eegista sidii xubnaha Baarlamanka Soomaliya yeelan doontaa u noqon lahaayeen kuwo leh tayadii, aqoontii iyo kartidii looga baahnaa. Madaama, Baarlamanku yahay hay'addii sharci dejinta waa ee dalka, waa lagama maar maan in lagu soo doorto hufnaan iyo il dheeri siyaado ah.

### **Mudanayaal iyo Marwooyin,**

Waxaan aaminsanahy hadii aan la nimaano niyad sami iyo karti dheeraad ah, Towakal saarano ALLAH SWT waan ku guuleysan doono dhameystirka wakhtiga KMG ah.

Waan in aan ku shaqeynaa falsaffadda ah ah aan wadajir ku shaqeyno. Maanta Soomaaliya waxaa u soo gurmaday beesha Caalamka, waxaa loogu yaboohay dhaqaale faro badan oo dalka oo dhan loogu talo galay in lagu dhiso; aan ka faaiideysano fursadaas qaaliga ah. Waxaa hubaal ah, walaalayaal haddii aan ku shaqeyno Soomaalinimo iyo maslaxdda shacabka in aan hor marino in aan wax badan qabsan karno, kana helayno gacan buuxda beesha caalamka.

Ugu Dambeeyntii,

Waxaan u mahad celinayaan Guddiga Madaxa Banaan ee dastuurka oo muddo ku howlanaa diyaarinta Dastuurka. Run ahaantii waxay qabteen shaqo aad u wanaagsan, maantana Shacabka Soomaaliyed waxay inoo ka fadhiyaan dhameystrika Dastuurka.

Sidoo kale, waxaan mahad u celinayaan Madaxweynaha Dowlad Goboleedka Puntland, Madaxda iyo Shacabka reer Puntland sidii ay noo soo dhoweeyeen iyo gogosha walaaltinimo ee ay noo fidiyeen.

Mahadsanid,